

LAMA DAGAANKA NABADDA BADAN EE MAGAALADA KU



Inta aad ku dhex lugaynayso Willow Reserve, codadka magaalada waxaa badalaya codadka shinbiraha ku raaran geedaha dushaada ah, caleemaha dabayshu ka sharqaminayso, iyo dareen nabadgalyo. Mararka qaar, tareenada ku agamaraaya waxay ku xasuusinayaan in aadan wali magaalada ka tagin. Talaabo kasta oo aad qaaddo, waxaa jira waxyaabo badan oo aad arkayso.

Ubaxa gabaldayaha ah ee Sawtooth

Ubaxa gabaldayaha ah ee Sawtooth wuxuu ka baxaa hareeraha baraagta. Asaga oo taagan 6-10 fiit dheerar ahaan, waxaa kamid ah ubaxyo caddaan, jaalle ah kuwaas oo soo baxa laga bilaabo dabayaaqada xagaaga ilaa jiilaalka horaantiisa.

Bacrimiyeyaal

Bacrimiyeyaal waxay soo bookhdaan ubaxyada ayaka oo raadnaaya cunto sida iniinta ubaxa ama budada bacrinta. Waxay budada bacrinta u qaadaan geedo kale, taasoo ka caawinaysa in ay soo saaraan iniino ama miro. Dadaku waxay bacrimiyeyaal ugu tiirsan yihiin 1 kamid ah 3 dii cuntada la cuno maalin walba.

Elderberry-ga guduudan

Red Elderberry waa geed soo jireen ah oo leh ubaxyo il-qabad leh iyo miro gaduudan inta lagu jiro bilaha gu'ga iyo xagaaga. Miruhu waa il cunto oo u wanaagsan shinbiro fara badan.

Shinbirta nooca baqalyada

Wood Ducks waxay ka raadsadaan iniino, miro, dhir, iyo cayayaan baraagta dhexdeeda. Kuwa labka ah waa kuwo qurux badan ayaka oo leh midab xabadka ah iyo midab cagaar ah. Waa ay isasoo raacaan gu' kasta waxayna dagaan buulal ay ka samaystaan geedaha dheerarkoodu gaarayo ilaa 65 fiit.

Geedka ubaxa bixiya ee Bee Balm

Bee Balm, oo sidoo kale loo yaqaano Wild Bergamot, waa geed Minnesota asal ah. Wuxuu kor u baxaa ilaa 6 fiit wuxuuna leeyahay ubaxyo casaan xigeen ama gaduud ah oo sida tuubada oo kale ah dhammaan inta lagu jiro dabayaaqada xagaaga kaas oo u wanaagsan shinbiraha iyo shinnida.

Redwing-ka Madow

Dhulka lama dagaanka ah waxa uu hoy u yahay in ka badan 30 nooc oo shinbiro ah. Red Wing Blackbird midka labka ah waxaa fudud in lagu arko garbihiisa gaduudka iyo jaalaha ah. Waxay ku tarmaan dagaanna dhulka qoyan waana kuwo si adag u ilaaliya buulashooda.

Xayawaanada Duurjoogta ah ee Dayrta

Ka aadi meelaha qoyaanaka ah raadadka xayawaanka sida deerada, dawacada, iyo shinbirka turkey-ga maalmaha barafku da'ayo. Imisa nooc oo kala duwan oo raadad ah ayaad ka heli kartaa?



Raha Boreal Chorus

Raha Boreal Chorus dheerarkiisu waa kaliya hal inji asaga oo leh suul balaaran taasoo ka caawinaysa in uu geedaha koro. Raha labka ah wuxuu kan dhadigga ah kusoo jittaa asaga oo samaynaya cod u eg sidii adiga oo farahaag ku jiidaya geesaha shanlada oo kale.

Taariikhda Dhulka lama degaanka ah ee Willow

Mdewakanton Dakota waxay ku noolaayeen xaafadooda Kopolia oo ku taala bariga Wabiga Mississippi muddo tobanaan sanno ah. Waxaa loo raray dhinaca galbeed ee wabiga, taasoo hadda ah Saint Paul, kaddib heshiis dhex maray Dakota iyo Dowladda Maraykanka dhulka waxaa lagu wareejiyaya Maraykanka.

Dadkii degenaa ee danaynayay wax beerashada, ka ganacsiga haragga iyo goosashada dhirta waxa ay u guureen Saint Paul. Dhulka loo yaqaano Willow Reserve waxa ay mulkiyaddiisu isbadashay marar fara badan. Dadka dariska la ah waxay bilaabeen in ay u doodaan ilaalintiisa 1960-kii Saint Paul ayaana si ayaana si rasmi ah uga aasaasay Willow Reserve gudaha Mississippi Flyway 1977.

Marinka shinbiraha ee Mississippi

Ikhtiraace ku xeeldheer ilaha dabiiciga ah ayaa soo ogaaday in Willow Reserve ay tahay goob muhiim u ah in shinbiraha geediga ah ay ku nastaan kana shidaal qaataan inta lagu jiro safarkooda ay ku marayaan Mississippi Flyway.



Wax badan ka Ogow

Scan for more information. | Escanea el código para más información | Yog xav paub ntxiv mus yees lub cim Lambarka halkan mari si aad u aragto faahfaahin | မေးခွဲ (စက်) အိမ်သုံးကဒ်းနိတ်ကစီပုံကုိုအါထီပုံအကိုတက့ၢ်.

